

Nidaamka Dacwadda Qodobka Nambar VI

Waaxda Wadooyinka Nebaska

Ruuxii aaminsan in lagu sameeyay heybsooc ku saleysan isir, midab, ama dalka uu kasoo jeedo wuxuu xareyn karaa dacwad wuxuuna buuxin karaa Foomka Cabashooyinka Qodobka Nambar VI ee heyadda. Dacwadaha waa in lagu soo gudbiyaa muddo 180 maalmood gudahood ah oo ka bilaabmeysa markii arrimaha laga cabanayaa dhacaeen. Cabashooyinka lasoo gudbiyo 180 maalmood kadib xaq uma yeelan doonaan in baaritaan lagu sameeyo.

Dhammaan dacwadaha Qodobka Nambar VI iyo qawaaniinta la xariirtaba waxaa loo texgeliyaa rasmi ahaan—mana jiraan qaabab aan rasmi aheyn. Cabashooyinka waa inay ahaadaan qoraal uuna saxiixaa qofka dacwoonaaya. Haddii cabashooyinka lagu soo gudbiyo wicitaan, macluumaadka waa la qorayaa waxaana loo bandhigayaa qofka cabanaya si uu u xaqiijyo ama dib u hubin ugu sameeyo dabadeedna u saxiixi inta aan laguda gelin dacwada. Cabashooyinka waa in laga helaa magaca qofka cabanaya, cinwaanka, nambarka taleefanka, waana in lagu caddeeyaa dhamman arrimaha iyo xaaladaha heysooca lasoo gudbiyay. Eedeymuhu waa in ay ku saleysnaadadaan arrimo ku lug leh qabiil, midab, ama dalka qofku kasoo jeedo. Dacwadaha waxaa lagu soo diri karaa iyadoo heyadda lagala soo xariirayo macluumaadkeeda xariir ee soo socda:

Nebraska Department of Roads

Attn: Transit Liaison Manager
1500 Hwy. 2 Lincoln, NE 68502
(402)-479-4694
kari.ruse@nebraska.gov

Dacwadaha heybsooca ee Qodobka Nambar VI ee soo gaara (magaca heyadda) waxaa loo gudbin doonaa dib u eegisna ku sameyn doona Qeybta Gaaadiidka ee Waaxda Wadooyinka ee Nebaska (Nebraska Department of Roads). Waaxda Wadooyinka ee Nebaska waxay Maamulka Gaadiidka Dowladda Dhexe u sheegi doontaa in dacwadii soo gaartay. Dacwoodahana waxaa soo gaari doonta waraaq u sheegeysa in dacwadii baaritaan lagu sameynaayo iyo in kale. Waaxda Wadooyinka Nebaska waxay heysataa 30 maalmood oo ay dacwadda go'aan uga gaarto. Haddii warar dheeraad ah loo baahdo si xal looga gaaro arrinta dacwada, heyaddu waxay la xariiri kartaa dacwoodaha si ay uga codsato faahfaahin dheeraad ah. Qofka dacwoonaya wuxuu heystaa 15 maalmood oo ka bilaabanta maalinta uu helo warqadda in uu ku soo gudbiyo faahfaahinta laga codsaday una soo gudbiyo dacwad baaraha.

Marka Dacwa Baaruhu dib u eegis ku sameeyo dacwadda, wuxuu soo saari doonaa laba warqadood midkood: warqadda xiritaanka ama warqad baritaanka. Warqadda xiritaanku waxay soo koobeysaa eedeymaha waxayna cadeeyneysaa in aysan jirin wax xad gudub ah oo lagu sameeyay Sharciga VI iyo in dacwadda la xiri doono. Warqadda baaritaanku waxay soo koobeysaa eedeymaha iyo wareysiyada la xariira dhacdada lasheegay waxayna faahfaahin doontaa in talaabo sharciyeed, tababar dheeri ah oo qofka shaaqalaha ah loo furo, ama talaabooyin kale ay dhici doonaan. Haddaba haddii dacwooduhu doorto inuu rafcaan (abiil) ka qaato go'aanka, wuxuu qofkaasi heystaa 30 maalmood oo ka bilaabmeysa maalinta uu warqadda xiritaanka ama baaritaanka helo inuu kusoo gudbisto rafcaankiisa.

Wixii faahfaahin dheeraad ahna, fadlan la xariir heyadda ama Waaxda Wadooyinka Nebaska adigoo wacaya taleefanka kor ku xusan. Waxaa khadka teleefanka laguugu diyaarin karaa turjumaan caawin kara dadka aan luuqadda Ingriiska si fiican ugu hadlin.

